Luuqadda ilmaha marka da'diidu ka bilaabato 6 bilood

Warbixin gaaban oo ku saabsan luuqadda ilmahaaga marka laga bilaabo 6 bilood

- Ilmahaagu aad ayuu u xiiseynayaa in uu wax walba ogaado! U dhug lahaw wax walba oo ilmuhu eegayo oo erey ugu sheeg. La samee wax walba oo xiiso leh, ha yaraadeen ama ha weynaadeene!
- Isla hadda ayuu ilmuhu bilaabayaa in uu kula hadlo isagoo isticmaalaya dhaqdhaqaaq iyo dhawaaq. Dhaqsana wuxuu u bilaabayaa in uu ku hadaaqo wax u eg ereyo.
- Ilmahaagu wuxuu tartiibtartiib u bilaabi doonaa in uu fahmo hadaaqa sida fiiri iyo ereyada sida hooyo iyo aabbe.
- ilmahaagu wuxuu jecel yahay kula hadlo, cayaaro oo kula heeso.

Kala hadal wax walba

Ka la hadal ilmahaaga waxa kasta oo dhacaya oo ku dhiirrigeli waxa uu xiiseynayo. Uga sheekee cuntada, dharka, waxa aad aragto iyo waxa ilmuhu samaynayo. Mar walba dhegeyso ilmaha waayo wuxuu ilmuhu ku dhiirranayaa in uu hadalka sii wato. Waqti ku filan sii!

Wax kala duwan oo ugu celceli

Ka dabadheh waxa ilmuhu ku hadaaqo oo isku day inaad fasirto micnehooda oo erey ugu yeerto. Sug inta ilmuhu hadaaq ama astaamo uga jawaabayo. Ilmuhu sidaas ayuu ku baranayaa in hadalka la kala sugo oo wuxuu fahmayaa sida ay isugu xiran yihiin hadal iyo shey.

Luuqadda hadba si u isticmaal

U hees oo laxan iyo luuq u yeel heesaha. Isticmaal faraha, dhawaaq iyo guux oo la kaftan! Maktabadda waxaad buugaag, heeso iyo muusig aad guriga u qaadan karto.

La hadal oo wax la akhri

Marka ilmuhu isha la raaco meelaha aad fiirineyso iyo waxa aad tilmaameyso waxay taasi u noqoneysaa sida buug uu wax ka barto. Sawirada farta ugu fiiq oo u sharrax. Una dhug lahaw wax walba oo uu ilmuhu xiiseynayo. Xiisahaasina wuxuu noqon mid gaaban, laakiin tartiibtartiib u kordheysa awoodda in ilmuhu wax u dhuglahaado.

Kula hadal luuqaddaada hooyo

Afkaaga hooyo kula hadal oo wax ugu akhri oo ugu hees. Carruurta dunida badankood waxay ku nool yihiin bey'ad looga hadlo luuqado badan, waana wax faa'iido badan in lagu koro ku hadal luuqad ka badan.

Halkaan wax dheeraad ka ogoow

- Ka sii akhriso warbixin ku saabsan Bokstart bartaan: www.bokstart.se
- La xiriir rugta daryeelka caafimaadka carruurta haddii aad ka welwelsan tahay horumar luuqadda ilmaha. Waxaad kaloo horumarinta luuqadda ilmaha kala hadli kartaa shaqaalaha dugsiga barbaarinta.

Dowladda ayaa Guddiga dhaqanka u xilsaartay in sare loo qaado waxakhriska horumarinta luuqadda carruurta yaryar. Bokstart waa waxqabad qaran oo loogu talagalay waalidiinta iyo dadka kale oo waaweyn oo carruurta haysta.

KULTURRÅDET

Bokstart

Luuqadda ilmaha marka da'diidu ka bilaabato 1 sano

Warbixin ku saabsan luuqadda ilmahaaga marka da'diisu ka bilaabato 1 sano

- Ilmuhu wuxuu isticmaalaa dhaqdhaqaaq iyo hadaaq uu wax kuugu sheego.
- Ereyada ugu horreeyaa waa waxa uu markaas arko, kubbad, alaab lagu cayaaro ama fiiri.
- Ilmahaagu wuxuu fahmaa ereyo badan oo uusan ku dhawaaqi karin, laakiin wuxuu u baahan yahay inaad ka caawinto sidii uu u turjumi lahaa oo ugu dhawaaqi lahaa.

La soco xiisaha ilmaha

Ku inaad wax walba oo aad aragto ama sameyneyso u isticmaasho hab horumarinaya luuqadda ilmaha. Erey ku sheeg waxa ilmuhu markaas daneynayo. Marka ilmuhu yiraahdo kaa, oo uu farta ku fiiqo mukulaal, ku dheh: Haa, waa mukulaal. Mukulaasha ma jeceshahay? Ku dalaal inaad sugto inta ilmuhu ka jawaabayo.

Dhegeyso oo u dhugyeelo

Marka aad ilmaha u dhuglahaato oo dhegeyusato wuxuu dareemayaa in waxa uu sheegayo uu muhiim yahay, ha noqoto erey, meel uu farta ku fiiqo ama hab kale oo uu wax kuugu sheego. Jawaabaha aad siiso wuxuu ilmuhu ku baranayaa in hadalka la kala sugo.

Luuqadda hadba si u isticmaal

U hees oo laxan iyo luuq u yeel heesaha. Isticmaal faraha, dhawaaq iyo guux oo la kaftan!

Wax tus oo uga sheekee

Uga sheekee alaabta ilmuhu ku cayaaro ama halka basku u socdo. U sharrax sawirada qaraabada iyo saaxiibada. Ilmuhu wuxuu u baahan yahay in uu maqlo ereyo badan waqtiyo kala duwan.

U akhri buugaag sawiro ah oo fudud

Waxaad hadda u bilaabi kartaa buuugaag sawiro ah. Marka sawirrada isla fiiriya oo farta ku fiiqa. Marka waxaa fudud inaad u sharraxdo, laakiin tartiibtartiib ayuu ilmuhu bilaabayaa in uu dhegeysto marka loo akhrinayo qoraalada buugga. Waxaa maktabadda ka heli kartaa in lagaa caawino buugaagta aad amaahan karto.

Kula hadal luuqaddaada hooyo

Afkaaga hooyo kula hadal oo wax ugu akhri oo ugu hees. Carruurta dunida badankood waxay ku nool yihiin bey'ad looga hadlo luuqado badan, waana wax faa'iido badan in lagu koro ku hadal luuqad ka badan.

Halkaan wax dheeraad ka ogoow

- Ka sii akhriso warbixin ku saabsan Bokstart bartaan: www.bokstart.se
- La xiriir rugta daryeelka caafimaadka carruurta haddii aad ka welwelsan tahay horumar luuqadda ilmaha. Waxaad kaloo horumarinta luuqadda ilmaha kala hadli kartaa shaqaalaha dugsiga barbaarinta.

Dowladda ayaa Guddiga dhaqanka u xilsaartay in sare loo qaado waxakhriska horumarinta luuqadda carruurta yaryar. Bokstart waa waxqabad qaran oo loogu talagalay waalidiinta iyo dadka kale oo waaweyn oo carruurta haysta.

KULTURRÅDET

Bokstart



Luuqadda ilmaha marka da'diidu ka bilaabato 18 bilood

Warbixin ku saabsan luuqadda ilmahaaga marka da'diisu ka bilaabato 18 bilood

- Carruur badan oo da'daan ahi waxay fahmaan ilaa 200 oo erey.
- Ilmuhu wuxuu isticmaalaa tiro ereyo ah, laakiin hadba micne goonni ah ayey u sameynayaan.
- Carruurta qaar ayaa durbadiiba bilaaba ereyo isku xiran, sida hooyo baabuur ama aabbe halkaas.

Wax badan isla hadla

Ka hadla waxa aad mar walba sameyneysaan. U sharrax ilmaha waxa dhacaya oo erey ugu sheeg waxa aad sameyneyso. Aad ugu dhuglahaaw sida ilmuhu wax u arko iyo waxa uu ku fekerayo. Waqti fiicanna sii ilmaha.

Sharrax oo horumari waxa ilmuhu sheego

Marka ereyada ilmaha isticmaasho oo kuwo cusub ku darto, waxaad ilmaha ka caawineysaa in luuqaddiisu horumarto. Ilmuhu badanaaba wuxuu isticmaalaa etreyo u gaar ah. Ha isku dayin inaad saxdo ee adigu isti9cmaal ereyada saxa ah si ilmuhu u maqlo oo u qabto.

Isticmaal ereyo la xiriira waxa ilmuhu daneynaayo

Marka aad ereyada ku xirto wax ilmuhu yaqaan, waxaa fududaanaya inuu fahmo oo barto waxyaalo cusub. Haddii aad aragto sawir surweel, waxaad farta ku fiiqi kartaa surweelka ilmuhu qabto adigoo oranaya: Adiguna surweel ayaad qabta sida ilmaha buugga ku sawiran.

La hadal oo wax la akhri

Ilmuhu wuxuu hadda aad u xiiseynayaa buugaag kala duwan oo aad ka wada sheekeysataan. Su'aalo ka weyddii waxa buugaagta ku qoran oo ku xir waxa ilmuhu soo arkay: Ma u maleyneysaa…? Ma xasuusataa…?

Kula hadal luuqaddaada hooyo

Afkaaga hooyo kula hadal oo wax ugu akhri oo ugu hees. Carruurta dunida badankood waxay ku nool yihiin bey'ad looga hadlo luuqado badan, waana wax faa'iido badan in lagu koro ku hadal luuqad ka badan.

Halkaan wax dheeraad ka ogoow

- Ka sii akhriso warbixin ku saabsan Bokstart bartaan: www.bokstart.se
- La xiriir rugta daryeelka caafimaadka carruurta haddii aad ka welwelsan tahay horumar luuqadda ilmaha. Waxaad kaloo horumarinta luuqadda ilmaha kala hadli kartaa shaqaalaha dugsiga barbaarinta.

Dowladda ayaa Guddiga dhaqanka u xilsaartay in sare loo qaado waxakhriska horumarinta luuqadda carruurta yaryar. Bokstart waa waxqabad qaran oo loogu talagalay waalidiinta iyo dadka kale oo waaweyn oo carruurta haysta.

KULTURRÅDET

Bokstart

Somaliska

Luuqadda ilmaha marka da'diidu ka bilaabato 3 sano

Warbixin ku saabsan luuqadda ilmahaaga marka da'diisu ka bilaabato 3 sano

- Carruur badani waxay hadda fahmaan boqolaal ereyo ah. Dhis jumlooyin gaaban oo kula hadal.
- ilmuhu wuxuu ku weyddiinayaa su'aalo badan oo wuxuu bilaabayaa in uu fahmo isticmaalka ereyada iyo sida loo isticmaalo.
- Ilmuhu wuxuu bilaabayaa in uu ka sheekeeyo wixii soo maray oo wuxuu jecel yahay in uu dhegeysto marka aad wax uaga sheekeyneyso.

Fahamka xarfaha iyo ereyada

Carruurta dhigata dugsiyada barbaarintu waxay xiiseeyaan xarfaha iyo ereyada. U akhri oo farta ugu fiiq waxa tabbeelayaasha iyo baakooyinka ku qoran mar walba oo ilmuhu xiiseeyo. Isla fiiriya astaamaha iyo calaamadaha aad aragtaan oo kala hadal waxa micnehoodu yahay.

U sharrax ereyada cusub

Ereyo cusub u isticmaal waxa dhacaya iyo waxa aad aragto. Sharrax ereyada uusan ilmuhu fahmeyn: Baddu waa haro aad u weyn. Ama: markaan xeebta tagno, badda ayaan ku dabaalannaa.

La hadal

Ilmaha kala hadal waxa maalintaas dhacay. La soo qaad waxa aad maqashay ama aragtay in ilmuhu ka sameeyey dugsiga barbaarinta oo ilmaha ku soo dhowey in uu ka sii sheekeeyo. Carruurta saddex sano jirka ah badankood ereyada badankood ugu ma dhawaaqi karaan sida dadka waaweyn. Haddaba marka aad maqasho in ilmuhu erey si qaldan ugu dhawaaqay, dheh sida saxa ah si ilmuhu u barto ereyga saxa ah.

Wax isla akhriya

Caado ka dhig in maalin walba xoogaa la akhriyo. Waxaa jira buugaag ay carruurta badankood jecel yihiin in mar walba loo akhriyo. Buugaagta sawirrada ahi waxay noqon karaan fahankoodu xoogaa adag yahay laakiin weli waa in loo sii wadaa akhrin iyo ka sheekeyn.

U bilow inaad kala hadasho waxa buuggu ku saabsan yahay oo aad ilmaha ku dhiirrigeliso in uu mar walba wax su'aalo. Marka ilmuhu wax ku su'aalo, istaag oo dhegeyso oo ka wada fekera.

Xasuusnow in cayaaruhu yihiin hab ay carruurtu wax ku barato. Haddaba, isla cayaara, wax isla akhriya, isla heesa oo sheekooyin ka wada sheekeeya. Heesaha, laxanka iyo muusiggu mar walba xiiso ayey leeyihiin. Akhrinta buugaagtui waa habka ugu wanaagsan oo ereyo cusub lagu barto!

Kula hadal luuqaddaada hooyo

Afkaaga hooyo kula hadal oo wax ugu akhri oo ugu hees. Carruurta dunida badankood waxay ku nool yihiin bey'ad looga hadlo luuqado badan, waana wax faa'iido badan in lagu koro ku hadal luuqad ka badan.

Halkaan wax dheeraad ka ogoow

- Ka sii akhriso warbixin ku saabsan Bokstart bartaan: www.bokstart.se
- La xiriir rugta daryeelka caafimaadka carruurta haddii aad ka welwelsan tahay horumar luuqadda ilmaha. Waxaad kaloo horumarinta luuqadda ilmaha kala hadli kartaa shaqaalaha dugsiga barbaarinta.

Dowladda ayaa Guddiga dhaqanka u xilsaartay in sare loo qaado waxakhriska horumarinta luuqadda carruurta yaryar. Bokstart waa waxqabad qaran oo loogu talagalay waalidiinta iyo dadka kale oo waaweyn oo carruurta haysta.

KULTURRÅDET

Bokstart

Somaliska